

Miisaaniyadda 2026: Maalgelinta Waxa Muhiimka ah

Febraayo 26, 2026

Miisaaniyadda 2026 waxay diiradda saaraysaa arrimaha ugu muhiimsan: xoojinta waxbarashada, hagaajinta daryeelka caafimaadka iyo taageeridda dadka ugu nugul ee Alberta.

Baahida fasallada, adeegyada caafimaadka iyo taageerooyinka bulshada ayaa sii kordhaya. Miisaaniyadda 2026 waxay ka jawaabaysaa arrintan iyadoo la sameynayo maalgelin bartilmaameed leh si loo xoojiyo adeegyada loona taageero reer Alberta marxalad kasta oo noloshooda ah.

Reer Alberta waxay filayaan daryeel waqtigiisa ku habboon iyo helitaan la isku halayn karo oo adeegyo caafimaad ah oo ku yaalla bulshooyinkooda. Si looga jawaabo caqabadaha iyo cadaadiska haysta nidaamka caafimaadka, dowladda Alberta waxay u qoondeysay \$34.4 bilyan kharash guud oo daryeel caafimaad ah si loo kordhiyo awoodda, loo yareeyo waqtiyada sugitaanka loona xoojiyo daryeelka safka hore. Maalgelintani waxay taageeri doontaa isbitaallada, adeegyada qalliinka, daryeelka aasaasiga ah iyo daaweynta caafimaadka maskaxda iyo balwadda. Sidoo kale, waxay ka caawin doontaa reer Alberta inay helaan daryeel u dhow guryahooda iyadoo kordhin \$1.9 bilyan ah (qiyaastii lix boqolkiiba) marka loo eego saadaasha 2025–26. Miisaaniyaddu waxay sidoo kale maalgelin ku sameynaysaa dhakhaatiirta qoyska iyo shaqaalaha caafimaadka safka hore, waxayna ka caawinaysaa dadka waayeelka ah inay si sharaf leh ugu noolaadaan guryahooda iyo bulshooyinkooda.

Fasallada Alberta ayaa noqday kuwo ka waaweyn kana adag, maadaama 80,000 arday ay ku soo biireen nidaamka waxbarashada saddex sano gudahood. Miisaaniyadda 2026 waxay sameyneysaa maalgelintii ugu badnayd abid ee waxbarashada Alberta oo dhan \$10.8 bilyan, taas oo ah kordhin \$722 milyan (7.2 boqolkiiba) marka loo eego saadaasha 2025–26. Maalgelintani waxay u gogol xaareysaa shaqaaleysiinta 3,000 macallin cusub iyo 1,500 kaaliyeyaal waxbarasho.

Maalgelinta rikoodhka ah waxaa ka mid ah \$560 milyan saddex sano gudahood si wax looga qabto kororka diiwaangelinta ardayda, iyo \$1.4 bilyan saddex sano gudahood si loo maareeyo kakanaanta fasallada. Miisaaniyadda 2026 sidoo kale waxay bilowday 40 mashruuc oo dugsii dadweyne oo cusub, taas oo qayb ka ah qorshaha dowladda ee dib-u-dayactirka iyo dhismaha dugsiyo badan oo ku yaalla bulshooyinka Alberta. Oggolaanshiyadan cusub ka dib, hadda waxaa socda in ka badan 161 mashruuc dugsii dadweyne oo firfircoon guud ahaan gobolka.

“Miisaaniyadda 2026 waxay diiradda saaraysaa waxa ugu muhiimsan qoysaska reer Alberta: qalliinno badan, waqtiyo sugitaan oo gaaban oo degdegga ah (emergency), helitaan wanaagsan oo dugsiyo iyo macallimiin ah, iyo taageerooyin bulsho oo loogu talagalay kuwa ugu baahida badan.

Nate Horner, Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda iyo Wasiirka Maaliyadda

Qodobbada Muhiimka ah ee Miisaaniyadda 2026:

Hagaajinta helitaanka isbitaallada, qalliinada, daaweynta iyo daryeelka degdegga ah

Miisaaniyadda 2026 waxay maalgelin ku samaynaysaa isbitaallada Alberta iyo awoodda qalliinka si loo daboolo baahida ka dhalatay tirada dadka oo sii kordhaysa, iyadoo ay ka mid yihiin:

- \$12.3 bilyan sanadka 2026–27 si loo maamulo nidaamyada isbitaallada iyo qalliinnada Alberta, loona taageero shaqaalaha, hawlaha qalliinka, adeegyada degdegga ah iyo baaritaannada (diagnostics). Tani waxaa ka mid ah:
 - \$6 bilyan oo loogu talagalay daryeelka degdegga ah (acute care), oo ay ku jirto \$525 milyan dheeraad ah oo loogu talagalay Hindisaha Qalliinka Alberta (Alberta Surgical Initiative), si loo dhammeeyo 50,000 qalliin oo dheeraad ah saddexda sano ee soo socota.
 - \$1.2 bilyan saddex sano gudahood oo loogu talagalay daryeelka kansarka, oo ay ku jirto \$223 milyan dheeraad ah oo loo qoondeeyay Cancer Care Alberta si loo shaqaaleysiiyo oncologists dheeraad ah, loo ballaariyo awoodda qalliinka, loo kordhiyo boosaska ka jira Machadka Kansarka ee Cross Cancer Institute, loona balaariyo helitaanka adeegyada taageerada kansarka.
 - \$21 milyan saddex sano gudahood oo deeqo ah si loo xasiliyo loona ballaariyo barnaamijyada kansarka ee bulshada ay bixiyaan hay’adaha kale, si bukaannada iyo qoysaskoodu u helaan daryeel joogto ah oo dhammaystiran.
 - \$1 bilyan oo kharash hawlgal ah oo loogu talagalay mushaharka iyo horumarinta dhakhaatiirta.
 - \$804 milyan sanadka 2026–27 oo loogu talagalay Adeegyada Caafimaadka Degdegga ah (Emergency Health Services).

Dhisidda awoodda nidaamka daryeelka caafimaadka iyadoo la maalgelinayo mashaariicda caafimaadka ee raasamaalka (capital funding)

Qorshaha Raasamaalka 2026 wuxuu sii wadayaa taageeridda mashaariicda waaweyn ee caafimaadka iyo hindiseyaasha socda, oo ay ka mid yihiin:

- \$1 bilyan oo loogu talagalay dib-u-habaynta iyo ballaarinta Red Deer Regional Hospital Centre.
- \$280 milyan saddexda sano ee soo socota, oo ay ku jirto \$149 milyan maalgelin cusub, si loo hirgeliyo Barnaamijka Horumarinta Sawir-qaadista Caafimaadka (Diagnostic Imaging Enhancement Program) oo lagu casriyeynayo lana ballaarinayo awoodda sawir-qaadista caafimaadka iyo daryeelka kansarka ee Alberta. Shaqadu waxay ku jirtaa beddelidda qalabka gabowga ah, soo bandhigidda tiknoolajiyad casri ah, iyo kordhinta awoodda nidaamka si loo daboolo baahida sii kordhaysa.

“Miisaaniyadda 2026 waxay samaynaysaa maalgelin xooggan oo lagu horumarinayo nidaamka daryeelka caafimaadka Alberta, iyadoo kordhinaysa awooddeenna aan ku daboolno baahida sii kordhaysa isla markaana aan ku bixinno daryeel tayo sare leh oo waqtigiisa ku habboon dhammaan reer Alberta.”

Matt Jones, Wasiirka Adeegyada Caafimaadka Isbitaallada iyo Qalliinka

Xoojinta daryeelka caafimaadka aasaasiga ah

Miisaaniyaddu waxay ballaarinaysaa helitaanka daryeelka caafimaadka aasaasiga ah iyadoo ay ka mid yihiin:

- \$6.9 bilyan oo kharash hawlgal ah oo loogu talagalay mushaharka dhakhaatiirta, taas oo ah kordhin 6.5% marka loo eego saadaasha 2025–26.
- \$87 milyan saddex sano gudahood si loo taageero barnaamijka kalkaaliyeyaasha takhasuska leh (nurse practitioner program).
- \$2.2 bilyan oo loogu talagalay daawooyinka iyo faa'iidooyinka caafimaadka ee dheeraadka ah, oo ay ku jirto barnaamijka daawooyinka waayeelka (seniors drug program), kaas oo ah qaybta ugu weyn ee taageerta in ka badan 700,000 waayeel.

“Daryeelka caafimaadka aasaasiga ah waa saldhigga nidaamkeenna caafimaadka. Miisaaniyadda 2026 waxay samaynaysaa maalgelin muhiim ah si loo ballaariyo loona xoojiyo daryeelka aasaasiga ah, si qof kasta oo reer Alberta ah uu u helo daryeelka uu u baahan yahay, waqtiga iyo goobta uu u baahan yahay.”

Adriana LaGrange, Wasiirka Adeegyada Caafimaadka Aasaasiga ah iyo Ka-hortagga

Taageeridda faydaqabka reer Alberta

Miisaaniyadda 2026 waxay maalgelin ku samaynaysaa nolol-kaalmaysan (assisted living) iyo taageerooyinka naafada iyadoo ay ka mid yihiin:

- \$5.9 bilyan oo loogu talagalay Assisted Living Alberta iyo Daryeelka Joogtada ah (Continuing Care) — taas oo ah kordhin ka badan \$495 milyan sanadkii hore — si loo bixiyo taageerooyin dhammaystiran oo caafimaad iyo kuwo aan caafimaad ahayn, daryeel guri, daryeel bulsho iyo adeegyo bulshada ah.

Tani waxaa ka mid ah:

- In ka badan \$145 milyan si looga caawiyayo bukaannada aan mar dambe u baahnayn daryeel degdeg ah (acute care) inay ugu gudbaan daryeel ku habboon oo ku yaalla bulshadooda.
- \$3.4 bilyan oo loo qoondeeyay taageerooyinka naafada sanadka 2026–27, si loo hubiyo in Alberta ay sii waddo inay yeelato barnaamijyada naafada ee ugu wanaagsan Canada, isla markaana dadka naafada ah ay sii helaan faa'iidooyin iyo taageerooyin muhiim ah.

“Miisaaniyadda 2026 waxay ka tarjumaysaa go'aan adag oo lagu hubinayo in reer Alberta ay helaan nolol-kaalmaysan tayo leh, taageerooyin naafonimo iyo adeegyo caafimaad oo muhiim ah. Anagoo

kordhinayna maalgelinta isla markaana ballaarinaayna barnaamijyada lagama maarmaanka ah, waxaan dhisaynaa gobol uu qof walba helo taageero iyo awood uu ku gaaro kartidiisa buuxda.”

Jason Nixon, Wasiirka Nolol Kaalmaysan iyo Adeegyada Bulshada

Ku dhisidda (xoojinta) taageerooyinka caafimaadka maskaxda iyo balwadda

Miisaaniyadda 2026 waxay taageeraysaa soo kabashada iyadoo ay ka mid yihiin:

- \$2.0 bilyan si loo taageero adeegyada balwadda iyo caafimaadka maskaxda, loona kordhiyo helitaanka taageerooyinka ay reer Alberta u baahan yihiin si ay u gaaraan soo kabasho. Tani waxaa ka mid ah:
 - \$1.7 bilyan oo loogu talagalay Recovery Alberta oo ah bixiyaha ugu weyn ee adeegyada caafimaadka maskaxda iyo balwadda.
 - \$30 milyan si loo sii ballaariyo fasallada caafimaadka maskaxda iyo bixinta taageerooyin caafimaad (clinical supports) oo loogu talagalay ardayda leh baahiyo caafimaad maskaxeed oo adag.
 - \$29.6 milyan si loo hawlgeliyo loona furo shan bulsho soo kabasho oo Indigenous ah sanadkan, taas oo keenaysa daaweyn balwad oo la deggan yahay (live-in treatment) oo dhaqan ahaan ammaan ah, loona adeegayo Bulshooyinka Indigenous ee si gaar ah u saameeyay dhibaataada balwadda.
 - \$26 milyan si loo abuuro 30 sariirood oo cilmi-nafsi (psychiatric beds) iyo 60 sariirood oo bulsho ku saleysan oo aad loogu baahan yahay, kuwaas oo loogu talagalay dadka aan mar dambe u baahnayn daryeel isbitaal joogto ah, taas oo yaraynaysa cadaadiska nidaamka daryeelka degdegga ah.
 - \$319 milyan saddex sano gudahood si loo dhiso kaabayaasha amniga leh ee lagama maarmaanka u ah hirgelinta faragelin naxariis leh (compassionate intervention) si loo caawiyo dadka la tacaalaya noocyada ugu daran ee balwadda iyo isticmaalka maandooriyaha inay helaan daryeel.
- \$82 milyan saddex sano gudahood oo maalgelin raasamaal ah si loo dhammeystiro dhismaha iyo hirgelinta bulshooyinka soo kabashada in capital funding to finish building and establishing recovery communities.

“Laga bilaabo mashaariicda raasamaalka ilaa adeegyada iyo taageerooyinka safka hore, waxaan go’an ka nahay in fayo-qabka reer Alberta uu ahaado mudnaanta koowaad. Miisaaniyadda 2026 waxay sii waddaa hirgelinta Qaabka Soo-kabashada Alberta (Alberta Recovery Model), iyadoo hubinaysa in dadka wajahaya balwad ama caqabado caafimaad maskaxeed ay helaan taageerada ay u baahan yihiin, waqtiga ay u baahan yihiin.”

Rick Wilson, Wasiirka Caafimaadka Maskaxda iyo Balwadda

Maalgelinta Waxbarashada Kindergarten ilaa Fasalka 12aad (K–12)

Miisaaniyadda 2026 waxay maalgelin ku samaynaysaa carruurta Alberta iyadoo ay ka mid yihiin:

- \$10.8 bilyan oo maalgelin hawlgaal waxbarasho ah si guddiyada dugsiyadu u shaqaaleysiiyaan macallimiin iyo kaaliyeyaal waxbarasho dheeraad ah, si wax looga qabto tirada fasallada oo kordhaysa iyo kakanaantooda, iyadoo weli la ilaalinayo kharash masuuliyad leh.
- In ka badan \$1.8 bilyan sanadka 2026–27 si loo taageero ardayda leh baahiyo waxbarasho oo gaar ah (specialized learning needs).
- \$560 milyan saddex sano gudahood si wax looga qabto kororka diiwaangelinta ardayda.
- \$355 milyan sanadka 2026–27 iyo wadar \$1.4 bilyan saddex sano gudahood si loo maareeyo tirada fasallada iyo kakanaantooda.
- \$3.3 bilyan saddex sano gudahood oo loogu talagalay kaabayaasha waxbarashada K–12 si loo taageero qorsheynta, naqshadeynta iyo dhismaha 161 mashruuc dugsi oo firfircoon, oo ay ku jirto \$600 milyan si loogu daro fasallo ku-meel-gaar ah (modular classrooms) si degdeg loogu daboolo baahida diiwaangelinta.
- \$90 milyan saddex sano gudahood iyada oo loo marayo Barnaamijka Cusub ee Raasamaalka Dugsiyada Madaxa-bannaan (Independent School Capital Program).
 - Barnaamijkani wuxuu abuurii doonaa ilaa 6,000 boos arday cusub, isagoo taageeraya ardayda leh baahiyo waxbarasho oo aad u adag, waxbarasho dhaqan ahaan ku habboon, iyo qoysaska doorta dugsi madaxbannaan.

“Maalgelintani waxay ku saabsan tahay diiradda saarista waxa ugu muhiimsan qoysaska. Waxay ka caawinaysaa dugsiyada inay la jaanqaadaan kororka diiwaangelinta ardayda, yareeyaan cadaadiska tirada fasallada, isla markaana hubiyaan in fasalladu helaan taageerada ay ardaydu u baahan yihiin si ay u guulaystaan.”

Demetrios Nicolaidis, Wasiirka Waxbarashada iyo Daryeelka Carruurta

Miisaaniyadda 2026 waxay diiradda saaraysaa waxa muhiimka ah iyadoo maalgelin bartilmaameed leh lagu sameynayo ardayda iyo fasallada, daryeelka caafimaadka iyo dhaqaalaha, isla markaana muujinaysa hoggaan maaliyadeed oo xooggan iyo xakameyn kharashaadka.

Macluumaad la xiriira

- Miisaaniyadda 2026

Warbaahinta kala duwan

- Daawo shir-jaraa'idka, kaas oo la heli doono marka xayiraadda warbaahinta (embargo) la qaado.

Weydiimaha Warbaahinta

Marisa Breeze

Marisa.Breeze@gov.ab.ca

780-235-4427

Xoghayaha Sare ee Warfaafinta, Guddiga Maaliyadda iyo Wasaaradda Maaliyadda



War saxaafadeed

Garrett Koehler

Garrett.Koehler@gov.ab.ca

780-427-5010

Xoghayaha Sare ee Warfaafinta, Waxbarashada iyo Daryeelka Carruurta

Maddison McKee

Maddison.Mckee@gov.ab.ca

780-427-3665

Xoghayaha Warfaafinta, Adeegyada Caafimaadka Aasaasiga ah iyo Ka-hortagga

Kyle Warner

Kyle.Warner@gov.ab.ca

780-644-8417

Xoghayaha Warfaafinta, Adeegyada Caafimaadka Isbitaallada iyo Qalliinka

Amber Edgerton

Amber.Edgerton@gov.ab.ca

780-643-6210

Xoghayaha Warfaafinta, Nolol-Kaalmaayan iyo Adeegyada Bulshada

Nathaniel Dueck

Nathaniel.Dueck@gov.ab.ca

587-336-6182

Xoghayaha Warfaafinta, Caafimaadka Maskaxda iyo Balwadda